



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Juun 14, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Macluumaad cusub oo ku saabsan fursadaha maalgelineed ee Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) wuxuu hayaa macluumaadka dhowr ah oo xiiso leh oo loogu talagalay mashruuca maalgelinta Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka (ARPA). Maalgelinta ARPA waxay taageertaa baahiyaha ka soo kabashada COVID-19 waxayna xoojinaysaa sinnaanshaha gobolka oo dhan iyada oo la adeegsanayo ballaarinta awoodda loogu talagalay goobaha ku saleysan guriga iyo bulshada.

Deeqdayadii lacageed uu horreysay ayaa loo furay codsiga. Maalgelinta Kaabayaasha ee loogu talagalay deeqda lacageed ee Hay'adaha Maareynta Kiiska ee Qandaraaska lala galay ayay heli karaan Barnaamijka Naafanimada Korriinka Bulshada (CDDP-yada) iyo Hay'aduhu.

Deeqaha lacageed oo badan ayaa dhawaan loo furi doonaa codsiga, iyada oo kuwo badan oo ka mid ahi ay mari doonaan [Oregon Buys](#). Haddii aadan horeba iskugu diiwaan gelin Oregon Buys, hadda waa waqti ku habboon in sidaasi la sameeyo.

Sidoo kale, waxaa jira macluumaad cusub oo ku saabsan [bogga internet-ka ee ARPA](#), oo ay ku jiraan guudmarka natoojinka oo ka socda laba ah ra'yi ururintii dhawaan. Deeqda lacageed ee Kala duwanaashaha, Sinnaanshaha iyo Ka mid noqoshada iyo Tiknoolajiyada ay HIPAA Oggolaatay waxay leeyihin meelo laga sii gelayo 'links' guudmarka natiijooyinka ra'yi ururinta.

Mashruucan ARPA wuxuu saameyn la taaban karo oo waarta ku yeelan doonaa nidaamkeena. Waxaan ka mahad celinaynaa dhammaan xiisaha iyo xamaasadda loo muujiyay barnaamijka.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan deeqda lacageed ee ARPA, fadlan email u dir ODDSARPA.funding@dhs.oregon.gov.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.